



War-saxaafadeed

Tar: 17/06/2016

Bulshada rayidka ah ee Somaliya waxay u aragtaa doorshada 2016 fursad hore loogu qaaday dimuqraadiyadda iyo deganaanshaha waddanka taasoo lagu heli karo hogaamiyayaal karti leh sharciyadna dadka ka haysta haddii ay u dhacdo si hufan, xor iyo xalaal ah.

Doorashadani waxay meesha ka saari doontaa dhibaatooyinkii soo jiidamayey 26ka sonnadood ee colaadaha iyo horumar la'aanta iyo dib u dhaca ku salaysan qabyaaladda, kooxaysiga iyo danaysiga gaarka ah.

Walow ay suurtoobi weydey in la qabto doorasho ku dhisan hal qof- iyo- hal cod haddana waa talaabo horumar leh oo fursad siinaysa qayb ka mid ah bulshada. Si kastaba ha ahaatee bulshada rayidka ahi waxay ka walaacsan tahay in doorashadu ay qab soomi waydo xiligii loogu talagalay.

Dalladda Bulshada rayid ka ah ee PUNSAA waxa ay usoo jeedinaysaa guddiga doorashada 2016 ee heer federal, Madaxda, iyo Beesha Caalamka qodobadan hoos ku xusan:

1. In ay si dhab ah u fuliyaan nidaamika iyo xeerarka loo dhigay doorashooyinka;
2. In ay hawlaha doorashada ka ilaaliyaan muran siyaasadeed, kooxaysi iyo ku danaysi;
3. In ay wax qabadkooda ku salayaan maslaxadda ummadda Soomaaliyeed dhinacna iska dhigaan kala feker duwanaanshahooda
4. In ay ka ilaaliyaan fara gelin lagu sameeyo xulidda xubnaha wax dooranaya iyo kuwa soo xulaya;
5. In si wanaagsan loola dhaqmo musharaxiinta u tartamaya in ay xubno ka noqdaan laba aqal.
6. In ka qaybgalka siyaasadeed ee haweenka iyo qoondada ay ku leeyihiin labada aqal laga dhigo waajibbaad ku salaysan hannaanka doorashooyinka oo aan la'aantood rag keliya la aqbali Karin.
7. In bulshada rayidka ah xubno laga siiyo guddiga doorashada ee heer dawlad goboleed si loo xaqiijiyo ka qaybgalka iyo daahfurnaanta hannaanka doorashooyinka.
8. Waa in guddiga doorashadu ay xil iska saaraan inaanay mas'uuliyiinta dawladda ee heer federal iyo heer dawlad goboleed ka dhigan hannaanka doorashada jaranjaro ay dib ugu soo noqonayaan awoodda dalka. Sidaas daraadeed, waa in beesha caalamku si dhow ula socoto hannaanka doorashada lana xisaabtanto madaxda Soomaalida.

Guddooyimaha Dalladda PUNSAA

Nuur Shire Cismaan

